Manus
KOM I GANG MED SKYPE

Qoraalkan waxaa lala isticmaalayaa qoraalka sawirrada wata ee PowerPoint ga ee Baro *Skype. Lambarka qodobka iyo lambarka qoraalka sawirka wata ee* PowerPoint ga waa isku mid. Qodobka 1aad wuxuu u dhigmaa qoraalka sawirka wata ee 1aad (bogga 1aad) ee PowerPoint ga. Qodobka 2aad wuxuu u dhigmaa bogga 2aad iwm. Isla qoraalkan ayaa bog walba oo kuwa sawirrada wata ah hoostiisa ku qoran.

Qoraalka ku qoran **khadda dhalaalaysa** waa faallo loogu tala galay qofka koorsada dhigaya. Qoraalka ku qoran FARTA WAAWEYN waa ciwaan. Qoraalka intiisa kale kor ayaa loo akhrin karaa ama qofka koorsada dhigaya ayaa isticmaali kara marka uu dadka wax barayo.

.

Qoraal

1. **Inta aadan koorsada billaabin dadka koorsada dhiganaya u sharrax hadafka waxbarashadaan laga leeyahay. Waxay taasi u fududayn doontaa in ay wax bartaan oo ay xasuustaan wixii ay barteen.**

2. WAA MAXAY SKYPE?

3. Skype waa adeeg kuu oggolaanaya in aad adiga oo internetka isticmaalaya qof wacdo, qof la hadasho adiga oo fiidiyowgana ka arkaya ama aad qoraal kula sheekeysato [chatte]. Adiga iyo qofka aad la hadlayso haddii aad koonto Skype ah leedihiin islamarkaana aad internet haysataan bilaash ayaad ku wada hadlaysaan. Dad badan oo Skype isticmaala ayaaba sababta ay u isticmaalaan waxay tahay in uu hadalka iyo wadahadalka fiidiyowga layska arkaayo ay bilaash yihiin, dal kasta oo la joogo iyo intii la doonaba wadahadalku ha socdee. Ilaa iyo inta adiga iyo qofka aad la hadlayso aad internetka ku jirtaan wax lacag ah idinkuma socoto. Waa suuraggal in inta lacag la bixiyo dabadeedna Skype lagula hadlo taleefan aan internet haysan, laakiin taas ku baran mayno koorsadaan. Ma dhacayso in aad si kama ah lacag ugu bixiso isticmaalka Skype, maxaa yeelay si cad ayaa laguugu sheegayaa marka aad lacagta bixinayso waana in aad xaqiijisaa in aad doonayso in aad lacag isticmaasho, si aad u hadashana waa in aad qortaa macluumaadka sidii aad lacagta ku bixin lahayd.

   Waxaad Skype ku isticmaali kartaa kombiyuutarka gacanta [nettbrettet], taleefannada

casriga ah ama kombiyuutarkaaga. Waxaa iyana sidoo kale suurtaggal ah in lagu waco Tv-yada casriga ah ama ciyaaraha casriga ah ee TV-yada. Tusaalayaasha koorsadaan lagu soo bandhigi doono waxaa laga soo qaatay kombiyuutar gacan, taleefanno casri ah iyo kombiyuutarro. Qalabka aad Skype-ka ku isticmaalaysa adiga ayaa u madaxbannaan.
Mar haddii aad wacaysid qof Skype isticmaala oo haysta qalab lagu hadli karo qalabkii aad doonto ayaad ka wici kartaa. Waxaad ka wici kartaa kombiyuutar gacan oo aad wici kartaa TV casri ah, kombiyuutar ayaad ka wici kartaa oo wici kartaa taleefan casri ah – laba kasta oo aad doonto ayaa laysku wici karaa. Waxa keliya ee loo baahan yahay ayaa ah in ay labada qofba leeyihiin koonto Skype ah.

4. QALAB

5. Habka ugu badan ee Skype-ka loo isticmaalo waa wadahadalka fiidiyowga. Markaas waxaad arkaysaa oo codkiisa maqlaysaa qofka aad la hadlayso, iyaguna waa ku arkayaan waana ku maqlayaan.

6. Kombiyuutar gacan iyo taleefannada casriga ah waxay leeyihiin shaashad, kaamarad, makaroofan iyo sameecad taas suuragelinaysa. Kombiyuutarrada gacanta intooda badanna waa leeyihiin.

7. In la isticmaalo xargaha dhegaha la gashado oo makaroofan leh ayaa dadka qaarkood u fiican, laakiin taas doorashadeeda xor baa loo yahay. Meelo xaraggahaas laga geliyo ayay geesaha ku leeyihiin taleefannada casriga ah iyo kombiyuutarrada gacanta.

8. Kombiyuutarrada (aan kuga gacanta ahayn) inta badan lama socoto kaamarad, makaroofan ama sameecad. Haddii aadan qalabkaan haysin, dukaammada ayaad raqiis uga soo iibsan kartaa.

9. Si aad wadahadal fiidiyow oo Skype la isticmaalayo qof ula yeelato adiga oo isticmaalaya kombiyuuyar waa in aad haysataa kaamarad web [webkamera]. Haddii aad kaamarad web soo gadato inta badan makaroofan ayay leedahay.
Sameecad codka soo saarta uma baahnid haddii aad isticmaalayso xargaha dhegaha ee

makaroofan leh.
Haddii ay sameecado codka soo saara kombiyuutarka ku xiran yihiin kuwaas waad isticmaali kartaa.

10. Dad badan ayaa doorbida xargaha dhegaha oo makarafoon leh si ay sanqar wanaagsan u helaan.

11. Sameecado iyo makaroofan waad u soo gadan kartaa kombiyuutarka, laakiin haddii aanu kaamarad lahayn sawirkaaga ma diri kartid, markaana wadahadalku wuxuu noqonayaa sidii wadahadal taleefan oo caadi ah oo aan sawir/fiidiyow lahayn oo kale.

12. Qof walba qalabkii uu doono ha haystee waxa aan laga maarmayn ee loo baahan yahay ayaa waxay yihiin internet iyo in aad koonto ka furato borogaraamka Skype.

13. LA SOO DEG SKYPE

14. Skype waxaad la soo degi gartaa isaga oo borogaraam ah ama isaga oo app ah ayaad kula soo degi kartaa kombiyuutarka gacanta, taleefannada casriga ah ama kombiyuutarrada.

15. Haddii aad kombiyuutar isticmaalayso waxaad xataa Skype ka geli kartaa adiga gelaya bogga borogaraamka.

    Laakiin waxaa wanaagsan in aad borogaraamka la soo degto oo aad ku xaraysato kombiyuutarkaaga, maxaa yeelay waxaa markaas lagu soo wici karaa adiga oo aan bogga ku jirin. Koorsadaan waxaan ka soo qaadaynaa in uu qof walba Skype la soo dego oo uu kombiyuutarka ku xaraysto.

16. Si Skype loola soo dego waa in dadka isticmaala kombiyuutarka gacanta iyo talaefanka ay galaan bogga lagala soo dego app-ka, oo ay raadiyaan Skype kaddibna app-ka la soo degaan. Hubso in aad internet haysato.

    Dadka kombiyuutarka isticmaala waxay gelayaan bogga skype.no, halkaas oo aad markiiba

arki doonto batoon weyn oo ay ku qoran tahay "Skype la soo deg". Batoonkaas riix oo taabo "ok" ama "aqbal" haddii uu kombiyuutarku ku weydiiyo in aad doonayso in aad borogaraamka la soo degto.

Hadda waa in uu qof walba Skype la soo dego oo ku xareeyo kombiyuutarka uu isticmaalayo.

Inta aadan halkaan dhaafin hubso in uu qof walba Skype la soo degay.

17. KOONTO SAMAYSO

18. Astaanta Skype ka soo hel shaashaddaada [skrivebordet]. Astaantu waa "S" ku jirta wareeg buluug ah. Astaanta riix si aad Skype u furto.

19. Sawirka hadda soo baxaya wuu kala duwanaan karaa oo wuxuu ku xiran yahay hadba kombiyuutarka aad isticmaalayso, laakiin meelaha aad buuxbuuxinayso si aad koonto u furato waa isku mid.

    In aad koonto ka furato Skype waa wax aad hal mar oo keliya u baahan tahay in aad samayso, sidaas darteedna aad muhiim uma aha in aad qaybtaan korka ka xafiddo. La soco tilmaamaha aad shaashaddaada ku aragto, wixii aad garan weydana aniga i weydii.

20. Sawirka aad hadda shaashadda ku aragto waa midka kuu soo bixi doona marka aad hadhow Skype gelayso, laakiin marka hore waa in aan koonto samaysannaa.

    Waxaad arki doontaa shaashadda meel ay ku qoran tahay "Koonto samayso", halkaan riix si aad samaysashada u billowdo.

21. Dadka isticmaala kombiyuutarka gacanta ama taleefan casri ah waxaa u soo baxaya warbixinta "Shuruudaha adeegga ".
    Akhri waxa halkaas ku qoran oo riix "Sii wad".

Dadka isticmaala kombiyuutarka waxaa loo gudbinayaa bogga internetka ee Skype. Mid mid u buuxi warbixinta lagaaga baahan yahay. Caawin i weydii haddii ay wax kugu adkaadaan.

22. Si aad Skype u isticmaasho waxaa lagaaga baahan yahay magac buuxa, magac Skype (naanays ama magac aad Skype-ka ku isticmaasho), ereyo fure ah iyo ciwaan iimayl.

23. Buuxi oo ka sii gudub.

24. Magaca Skype-ka ee aad dooratay haddii uu qof kale isticmaalo, Skype ayaa magac kale kuu soo jeedin doona.

25. Hadii aad doonayso in aad isticmaasho magacaas Skype-ka waxaad taabanaysaa batoonka sii wad. Haddii kalena, magac kale ayaad qoraysaa oo mar kale isku dayaysaa.

26. Marka aad samaysato magac Skype oo adiga kuu gaar ah, islamarkaana aad qorto warbixinta lagaaga baahan yahay, ayuu Skype hubin doonaa koontaada.

    Sug ilaa iyo inta ay dadku halkaan ka soo wada gaarayaan.

27. Hadii aad rabto dadka kuugu jira kombiyuutarka ayuu Skype si otomaatig ah halkaas uga soo qaadan karaa, laakiin adiga laftigaaga ayaa middan gadaal ka samayn kara.

    Riix batoonka si aad horay ugu sii socoto.

28. Raac tilmaamaha shaashadda ka hor inta aadan halkan ka gudbin.

29. Kuude ayaa SMS laguugu soo diri doonaa, kaas oo aad gelinayso si aad u xaqiijiso in uu lambarka taleefanku yahay kaagii.

30. Koonto Skype ayaad leedahay marka aad intaas samayso.

31. Waxaa hadda laga yaabaa in uu Skype ku weydiiyo in uu kuu soo diri karo farriimo iyo in aad Skype u oggoshahay makaroofankaaga iyo kaamaraddaada. Haa uga jawaab su'aalahaan, si aad u maqasho marka lagu soo waco – islamarkaana qofka aad la hadlayso uu kuu arki karo oo kuu maqli karo.

32. Haddii aad iimaylkaaga furtid na waxaad arki doontaa in uu Skype kuu soo diray farriin soo dhoweyn ah oo ay la socoto warbixinta adeeggaan.

33. SKYPE BILLOW OO GAL

    Ka codso in kulli la xiro meesha ciwaanka lagu qoro iyo borogaraamyada kombiyuutarka ee furan – loona laabto shaashadda.

34. Waa in ay qof walba astaantii Skype shaashadda u saaran tahay. Sida ugu dhakhsaha badan ee Skype lagu galo waa in halkan la riixo.

    Ka codso in uu qof walba kombiyuutarkiisa Skype ka galo.

35. Waxaa hadda soo baxaya bogga laga galo. Muuqaalkiisu wuu kala duwanaan karaa oo waxay ku xiran tahay in aad isticmaalayso kombiyuutarka gacanta, taleefan casri ah ama komboyuutar. Laakiin warbixinta lagu weydiinayo had iyo jeer waa isku mid.

36. Qor warbixinta oo riix batoonka "Gal ".

37. Maaddaama ay tahay markii koowaad ee aad Skype isticmaasho, ayaa waxaa dhici karta in uu borogaraamku ku siiyo tilmaamo iyo warbixinno. Waxa aad shaashaddaada ku arkeyso waxay ku xiran tahay in aad isticmaalayso kombiyuutarka gacanta, taleefan casri ah ama kombiyuutar.

    Waxyaalaha soo socda ayaa kuu soo bixi kara marka aad isticmaalayso kombiyuutarka gacanta. Waxaa wanaagsan in aad warbixintan akhriso oo aad wakhti ku qaadato kaddib

na ka sii gudubto.

38. Dadka kombiyuutarrada isticmaalaya waxaa laga yaabaa in la weydiiyo in ay hubiyaan qaabka sawirrada iyo codka kombiyuutarka. La soco tilmaamaha aad shaashaddaada ku aragto oo tillaaba-tillaabo horey ugu sii soco. Wixii kugu adkaadana aniga i weydii.

39. Sawirkaan ayaa loo baahan yahay in uu soo baxo maka aad Skype gasho. Waana sawirkaan midka kaa hor imaan doona mustaqbalka marka aad adeeggaan isticmaalayso.

    Sida aad aragtaan ba sawirku wuu kala duwan yahay oo wuxuu ku xiran yahay hadba kombiyuutarka aad isticmaalaysaan. Laakiin waxyaalaha aad isticmaalayso waa isku mid. Hadda Skype ayaad ku jirtaa.

    Hubi in kulli sawirkaan la yimid ka hor inta aadan halkaan ka gudbin.

40. XIRIIRRO HEL

41. Si aad qof kale bilaash Skype ugula hadasho, waa in uu qofkaasi koonto Skype ah leeyahay. Si aad haddaba qof ula xiriirto waa in aad heshaa koontada qofkaas oo aad ka dalbataa in aad xiriirtaan. Dadka doonaya in ay kula soo xiriraan ayaa iyaguna ku soo dalban kara.

42. Si aad qof u hesho waa in aad marka hore heshaa weyneysada wax lagu baaro oo aad riixdaa.

    Ka codso kulli in la helo weyneysada kaddibna la riixo. Ha ka gudbin ilaa iyo inta uu qof walba arrintan ka samaynayo.

    Tusaalaha aan hadda isticmaalayo waxaan ka soo qaatay app, sidan ayuuna u eg yahay marka la isticmaalayo kombiyuutarka gacanta ama taleefan casri ah. Laakiin tillaabooyinka la marayo iyo farriimuhu waa isku mid makiinad walba oo aad isticmaashaba.

43. Qor magaca Skype-ka, magaca, lambarka taleefanka ama ciwaanka iimaylka ee qofka aad raadinayso.

    Ka codso in uu qof walba raadiyo dadka kale ee fasalka, si ay dhexdooda ugu tababbartaan sida Skype loo isticmaalo.

44. Riix "Gal" ama "Raadi" si uu Skype u raadiyo qofka aad doonayso.
    Dadka isticmaala taleefan casri ah waa in ay riixaan meesha ay ku qoran tahay "Riix si aad xiriirro cusub u hesho".

45. Wuxuu Skype markan ku tusayaa liiska dad uu u malaynayo in ay yihiin kuwa aad raadinayso.

    Hel qofka oo riix magaciisa.

46. Riix "Dir dalab xiriir " ama "Xiriirrada ku darso".

47. Waxaad hadda qofka ku arkaysaa liiska dadka aad xiriirka la leedahay, Skype-ka ayaadna qofkaas ku wici kartaa isla marka uu aqbalo dalabkii aad u dirtay.

    Marka uu qof kaa soo codsado in uu kula xiriiro, Skype ayaa farriin kuu soo diri doona. Dalabkaas waad aqbali kartaa, waadna diidi kartaa. Haddii aad aqbasho, markaas Skype ayaad isku wici kartaan adiga iyo qofkii dalabka kuu soo diray.

48. QOF LIISKA KUUGU JIRA WAC AMA HA KU SOO WACO

49. Si aad qof u wacdo waa in aad horta ka baartaa liiska dadka aad xiriirka la leedahay. Liiska ayaad kor iyo hoos u raaci kartaa oo qof ka baari kartaa ama qaybta raadinta ayaad ku qori kartaa magaca qofka aad doonayso in aad wacdo.

Manus
KOM I GANG MED SKYPE

50. Marka hore qofka riix, kaddibna calaamadda kaamarada ama midda taleefanka ee shaashadda si aad u wacdo.

51. Haddii aad taleefanka riixdo, markaas waxaad wacaysaa adinka oo aan is arkayn oo waxaad u wada hadlaysaan sidii adinka oo taleefan ku hadlaya.

52. Haddii aad kaamarada riixdo fiidiyow toos ah ayaad isku arkaysaan.

53. Senyaaluhu wuxuu ka baxayaa kombiyuutarka uu Skype-ku kuugu jiro wuxuuna gaaraya midka uu Skype-ku ugu jiro qofka aad wacayso.

54. Marka lagu soo waco waxaad maqlaysaa cod dhacaya, sawirkaan ayaadna shaashaddaada ku arkaysaa.

55. Waxaad kala dooran kartaa 3 wax marka lagu soo waco.

    Haddii aad batoonka guduudan riixdo waxay la mid tahay in aad diidday in aad qofkaas la hadasho.

56. Haddii aad riixdo batoonka cagaaran ee ay gacanta taleefanku ku sawiran tahay waad qabatay wadahadalkii, laakiin qofka kale codkaaga oo keliya ayuu maqli karaa ee fiidiyow kaama arki karo marka aad wada hadlaysaan.

57. Haddii aad riixdo batoonka cagaaran ee ay kaamaradu ku sawiran tahay waad is arki kartaan marka aad wada hadlaysaan, haddii aad labadiinnuba haysataan qalabkii loo baahnaa.

58. Sawirka shaashaddaadu wuxuu markaas u ekaanayaa si sidaan u dhow.
    Waxaa kuu soo baxaya qofka aad la hadlayso sawirkiisa oo weyn, iyo kaaga oo yar oo kaaga soo baxaya geeska midige ee hoose.

Manus
KOM I GANG MED SKYPE

59. Sawirkaagu waa midka ka soo baxaya shaashadda qofka aad la hadlayso.

60. Qofka aad la hadlaysana sidaas oo kale ayaa u soo baxaysa. Sawirkaaga oo weyn ayay shaashadda ku arkayaan, iyo sawirkooda aad adigu aragto oo yar oo uga soo baxaya midigtooda hoose.

61. Shaashadda kombiyuutarka waxaad had iyo jeer ku arkaysaa afar calaamadood.

62. Isla calaamadahaas ayaa soo baxaya haddii aad hal mar riixdo shaashadda kombiyuutarka gacanta ama taleefanka casriga ah.

63. Haddii aad sawirka kaamarada hal mar riixdo qofkii kula hadlayay kuma arki karo.

64. Haddii aad haddana mar kale botoonka riixdo sawirkii ayaa soo laabanaya.

65. Haddii aad sawirka makaroofanka hal mar riixdo qofku hadalkaaga ma maqlayo.

66. Haddii aad mar kale riixdana codkii ayaa soo laabanaya.

67. Calaamadda ku-dartu waxay kuu oggolaanaysaa in aad dad kale wadahadalka ku soo darto. Haddii aad rabto hadhow ayaad taas isku dayi kartaa. Koorsadaan taas wakhti ku lumun meyno.

68. Si aad wadahadalka u joojiso waxaad riixaysaa batoonka guduudan.

69. Dadka isticmaala kombiyuutarka gacanta iyo taleefanka casriga ah waxay leeyihiin waxyaalo dheeri ah.

70. Sidan ayay u eg yihiin. Kaamarad fallaar ku wareegsan tahay.

Manus
KOM I GANG MED SKYPE

71. Haddii aad taas riixdo kamaradda kombiyuutarka gacanta ama midda taleefanka gacantu ayada oo kaa sii jeedda ayay wax duubaysaa.

72. Qofka aad la hadlayso weli wuu arki karaa oo maqli karaa waxa aad duubayso, laakiin adiga kuma arki karo.

73. Mar kale batoonka riix si aad kaamarada adigu isugu soo jeediso

    Waxyaalo kale oo ay ka mid yihiin jaad ayuu Skype leeyahay. Kuwan internetka ayaad ka baari kartaa ama waxaad tijaabin kartaa marka aad khibrad u yeelato isticmaalidda Skype.

74. KA BAX

75. Dad badan baa doorta in ay Skype-ka had iyo jeer ku jiraan si had iyo jeer loo soo wici karo. Laakiin haddii aadan doonayn in lagu soo waco, ama aad Skype ga gashay kombiyuutar ay dad badan isticmaalaan waxaa habboon in aad ka baxdo. Waa wax fudud, waxa keliya ee aad u baahan tahay si mar kale laguu helana waa in aad gasho.

    Batoonka la riixo ee looga baxo marba waa si oo waxay ku xiran tahay in waxa aad isticmaalayso ay yihiin kombiyuutarka gacanta, taleefan casri ah ama kombiyuutar.

76. Haddii aad isticmaalayso taleefan casri ah waa in aad riixdaa batoonka ku yaalla bidixda sare ee sawirka. Waa midka u eg saddexda layn ee dadban.

77. Waxyaalaha la kala dooran karo ee soo baxa riiix meesha ay ku qoran tahay "Ka bax ".

78. Haddii aad isticmaalayso kombiyuutarka gacanta waxaad meesha shaashadda ugu hooseysa ku arkaysaa astaan yar oo ay ku qoran tahay "Aniga igu saabsan". Middan riix.

79. Shaashadda soo baxda riix meesha ay ku qoran tahay "Ka bax ".

Manus
KOM I GANG MED SKYPE

80. Haddii aad kombiyuutar isticmaasho waxaad riixaysaa meesha ay Skype ku qoran tahay ee laynka wax laga doorto ee shaashadda ugu korreysa.

81. Doorashada hadda soo baxda riix "Ka bax".

Ka codso in dhammaan Skype laga baxo.

82. DHAMMAAD